



Anansi iyo xikmad

- ✎ Ghanaian folktale
- 🌐 Wiehan de Jager
- 💬 Anwar Mohamed Dirie
- 💬 Somali
- 📊 Level 3



Waagii hore dadku waxba ma aysan aqoon. Ma aynan aqoon sida miro loo beero ama sida dhar loo sameeyo ama sida bir qalab looga sameeyo. Illaaha cirka kore ee Nyame ayaa lahaa xikmadi aduunka oo idil. Waxa uu na ku kaydiyey dhari dhoobo ah.



Maalin maalmaha ka mid ah, Nyame waxuu goansaday in uu dhariga xikmada ah siiyo Anansi. Mar walba oo uu Anansi eego gudaha dhariga dhoobada ah, waxuu bartaa wax cusub. Waxa ayna ahayd arin aad u xiiso badan!



Damaaci Anansi waxuu ku fikiray “waa in aan ku xafidaa dhariga dusha geed dheer. Si aan dhamaan kaligay u heysto!” Waxa uu soohay xarig dheer, dharigii dhoobada ayuu ku wareejiyay, dhexda ayuuna ku sii xirtay. Waxuu bilaabay in uu geedka fuulo. Lakin aad ayay ugu adkayd fuulida geedka ayadoo dhariga ka garaacayay jilbaha mar walba.




Intaa oo dhan Anansi wiilkiisi yaraa ayaa taagnaa geedka hoostiisa oo daawanayay. Waxuu yiri, “Miyaysan sahlanaan laheyn in aad fuusho hadii aad dhariga dhabarka ku xirato?” Anansi waxa uu isku dayay ku xirashada dharigii dhoobada ahaa oo ay xikmadu ka buuxday dhabarkiisa, waxayna dhab ahaanti aheyd mid in badan fudud.



Waqti yar ba waxuu gaaray geedka dushiisa. Laakiin markiiba wuu istaagay waxa uu na ka fikiray, “Aniga uun bay ahayd midka heysto xikmad oo dhan, hadana meeshan wiilkayga ayaa iga xariifsan aniga! Anansi aad buu u carooday dharigii dhoobada ayuu geedka kasoo tuuray.



Dhulka ayuuna jajab ugu burburay.
Xikmaddii way xorowday si qof waliba
qayb uga helo. Waana sababta ay
hadda dadku u barten sid loo beerto,
sida dhar loo tosho, qalab looga
sameysto birta, iyo wax walba oo kale
oo dadku ay hada yaqaanaan sida loo
sameeyo.



Storybooks Canada

storybookscanada.ca

Anansi iyo xikmad

Written by: Ghanaian folktale

Illustrated by: Wiehan de Jager

Translated by: Anwar Mohamed Dirie

This story originates from the African Storybook (africanstorybook.org) and is brought to you by Storybooks Canada in an effort to provide children's stories in Canada's many languages.



This work is licensed under a Creative Commons
[Attribution 3.0 International License](http://creativecommons.org/licenses/by/3.0/).